# Xuquuqdaada Baro: Xuquuqda Dadka Soo Haajira

*Iyada oo aan loo eegin sharciga aad wadanka ku joogto, waxaa jira xuquuq uu kuu ogol yahay Dastuurku. Halkan ka baro xuquuqdaas aad leedahay iyo sida aad uga faa''ideysan karto*

<u>**Ciidanka nabadgelyada waxa ay ku weydiinayaan sharciga aad wadanka ku joogto**</u>

**Sidee loo yareeyaa khatarta kugu iman karta**

- Is daji Ha cararin, ha murmuin, ha is adkeyn, saraakiisha haka hor istaagin shaqadooda, xitaa haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada lagu xad gudbay. Gacmahaaga markasta waa in ciidanku arkayaan
- Been haka sheegin sharcigaaga ama ha tusin aqoonsi been ah.

**Xuquuqdaada:**

- Waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato khasabna kuguma aha in aad ciidamada nabadgelyada, saraakiisha socdaalka kala hadasho sharciga aad wadanka ku joogto ama aad heysato dhalashada. Wax kasta oo aad saraakiisha u sheegto waxaa loo adeegsadaa lidigaaga maxkamadaha socdaalka.
- Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka oo saraakiisha socdaalku ku weydiiyaan aqoonsi, waa in aad tustaa haddii aad heysato aqoonsi.
- Haddii saraakiisha socdaalku ku weydiiyaan in ay ku baari karaan, xaq waxa aad u leedahay in aad tiraahdo maya. Saraakiisha xaq uma laha in ay adiga iyo alaabadaada baaraan adiga oo aan ogolaan ama uusan jirin tuhun macquul ah.
- Haddii ay da'daadu ka weyn tahay 18 sano waa in aad wadataaa qoonsigaaga xilli kasta. Haddii aadan heysan, waa in aad saraakiisha u sheegtaa in aad dooneyso in aad iska aamusnaato, ama aad dooneyso in aad qareen la tashato ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha.

**Maxaan yeelayaa xaladdan oo kale**

- Gobolada qaarkood, waa waajib ah in aad magacaaga u sheegto ciidanka nabadgelyada haddii ay ku joojiyaan oo lagu dhaho is sheeg. Xitaa haddii aad magacaaga sheegto, waajib kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha kale.
- Haddii adiga oo gaari wada ciidamadu ku joojiyaan, saraakiishu waxa ay waajib kaaga dhigi karaan in aad tusto leesinkaaga, lahaanshaha gaariga iyo ceymiska gaariga laakiin kuma khasbanid in aad su'aalaha ka jawaabto.
- Saraakiisha socdaalka waxa ay ku weydiin karaan sharciga aad wadanka ku joogto marka aad waddanka ka baxeyso ama soo galeyso. Haddii aad heysato sharciga deganaashaha rasmiga ah (LPR), waxaa lagaa doonayaa in aad ka jawaabto oo kaliya su'aalaha ku saabsan aqoonsigaaga iyo deganaashaha sharciga ah. Su'aalaha oo aad diido in aad ka jawaabto waxa ay keeni karaan dib u dhab, laakiin saraakiishu kuuma diidi karaan in aad soo gasho waddanka su'aalaha oo aadan ka jawaabin darteed. Haddii aad heysato dal ku gal, waa laguu diidi karaa in aad waddanka gasho haddii aad diido in aad ka jawaabto su'aalaha saraakiisha.

Goobo kale oo dheeraad ah

**<u>Waxaa i joojiyey boliiska ama ICE</u>**

**Sidee loo yareeyaa khatarta kugu iman karta**

- Is daji oo ha is adkeyn ama saraakiisha haka hor istaagin shaqadooda
- Been ha sheegin ama saraakiisha ha siin aqoonsi been abuur ah.
- U diyaargaroow adiga iyo qoyskaaga haddii ay dhacdo in lagu xiro Dusha ka xusuusnow lambarada telefoonka ee qoyskaaga iyo qareenkaaga. Samee qorshaha degdegga ah haddii adiga iyo ilmahaaga aad daawo qaadataan.

**Xuquuqdaada:**

- Waxa aad xaq leedahay in aad iska aamusnaato. Haddii aad dooneyso in aad sidaas yeesho, kor ugu qeyli. (Gobolada qaarkood, waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo in aad magacaaga sheegto oo aad is cadeyso.)
- Lagaama doonayo in aad ogolaato in la baaro adiga iyo alaabadaada, laakiin ciidamadu dusha sare ayey gacanta kaa marin karaan haddii ay ka shakiyaan in aad hub heysato.
- Haddii ay saraakiishu ku xiraan, waxa aad xaq u leedahay in dawladdu qareen kuu qabato.
- Haddii ay ICE ku xiraan, waxa aad xaq u leedahay in aad qareen la tashato, laakiin xaq uma lihid in dawladdu qareen kuu qabato. Waxa aad weydiisan kartaa liiska qareenada lacag la'aanta ah ee dadka caawiya.
- Kahasab kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan halka aad ku dhalatay, haddii aad heysato dhalashada Mareykanka, ama sida aad waddanka ku soo gashay. (Sharciyo u gaar ah ayaa jira xuduudaha caalamiga ah iyo gegida diyaaradaha, iyo dadka heysta noocyada gaar ah ee dal ku galka dadka soo haajira, oo ay ka mid yihiin kuwa dalxiiska iyo ganacsatada.)

**Maxaad yeeleysaa haddii lagu xiro ama lagu hayo**

- Waxa aad tiraahdaa waan iska aamusnaanayaa oo weydiiso qareen markiiba Ha bixin wax faahfaahin ah ama cudurdaar ah. Waxba ha oran, waxba ha saxiixin, hana gaarin wax go'aan ah qareen la'aan.
- Haddii ay saraakiishu ku xiraan, waxa aad xaq u leedahay in aad telefoon dirsan karto. Saraakiishu kuma dhageysan karaan haddii aad qareen la hadleyso
- Haddii ay saraakiisha ICE ku xiraan, waxa aad xaq u leedahay in aad la xiriirto qunsilayadaada ama xafiis wargeliya qunsuliyadda in lagu xiray.
- Xusuuso lambarka waaxda socdaalka (Lambaka ka bilowda "A") oo qoyskaaga sii. Waxa ay caawineysaa in reerkaagu ogaado halka aad joogto.
- U dhiib aqoonsiga socdaalka qof aad aamini karto.
- **Haddii aadan heysan dhalashada:** Waydii qareenkaaga saameynta sharcigaaga ku yeelan karo fal dambiyeed horey laguugu qaaday ama aad qiratay. Ha kala hadlin sharciga aad waddanka ku joogto qof kale oo aan aheyn qareenkaaga. Inta aad xiran tahay, waxaa suurogal ah in saraakiisha socdaalku ku soo booqdaan. Haka jawaabin su'aalahooda ama waxba ha saxiixin ka hor inta aadan la hadlin qareen. Akhri dhamaan warqadaha laguu keeno. Haddii aadan fahmin ama aad akhrin karin warqadaha, u sheeg sarkaalka in aad dooneyso turjubaan.

**Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada lagu xadgudbay**

- Qor wax kasta oo aad xasuusato, oo ay ka mid tahay lambarka sarkaalka, lambarka gaariga ay wataan, hay'adda ay ka socdaan iyo macluumaadka kale. Isku day in aad hesho halka lagaala xiriirayo dadka goob joogga ahaa.
- Haddii aad dhaawacan tahay, weydiiso in aad aragto dhakhtar markiiba oo sawir ka qaad dhaawacaaga.
- Qor cabasho qoraal ah una gudbi xafiiska cabashada ee hay'adda ama gudiga dacwadaha madaniga ah. Xaaladaha qaarkood, waxa aad cabasho u soo gudbin kartaa adiga oo magacaaga qarinaya.

**<u>Booliiska ama ICE ayaa yimid aqalkeyga</u>**

**Sidee loo yareeyaa khatarta kugu iman karta**

- Is daji oo albaabada ha kuu xirnaadaan. Albaabka oo aad furto ma u ogolaaneyso in ay ku soo galaan, waxa amaan ah in aad la hadasho albaabaka oo xiran.

**Xuquuqdaada:**

- Waxaa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato, xitaa haddii uu sarkaalku heysto ogolaasho maxkamadeed.
- Khasab kuguma aha in aad saraakiisha u ogolaato in ay gurigaaga soo galaan
- Haddii uu booliisku wato amar xarig ah oo maxkamadeed, waxa uu sharcigu u ogol yahay in ay geli karaan guriga haddii ay aaminsan yihiin in qofka xariga loo soo jaray uu ku jiro guriga. Laakiin amarka dhoofinta/ka saaridda wadanka (form I-205) uma ogolaanayo in saraakiishu galaan guriga ogolaasho la'aan.

**Maxaan yeelayaa marka ciidanka nabadgelyada ama ICE yimaadaan.**

- Weydii haddii ay ka socdaan waaxda socdaalka iyo waxa ay doonayaan.
- Weydii in saraakiisha ay daaqadda ama miraayadda la iska arko ee albaabka kaa tusaan aqoonsigooda.
- Weydii haddii ay heystaan ogolaashaha maxkamadda. Haddii ay yiraahdaan waan heysanaa, weydiiso in ay albaabka hoosta ka soo geliyaan ama daaqadda kaa tusaan.
- Been ha sheegin hana tusin aqoonsi been abuur ah. Wax qoraal ah ha saxiixin adiga oo aan qareen la tashan.
- Ha furin albaabka ilaa ICE ay ku tusaan amar maxkamadeed oo u ogolaanaya in ay baaraan gurigaaga ama amar xariga ah oo dadka guriga deggan ah ama uu cinwaan u yahay. Haddii aysan heysan amar maxkamadeed, albaabka ha kuu xirnaado. Si cad u dheh: "Ma ogoli in aad guriga soo gashaan."
- Haddii ay saraakiishu xoog ku soo galaan, ha hor istaagin. Haddii aad dooneyso in aad xaqaaga ceshato, Cod dheer ku dheh: "Ma ogoli in aad soo gashaan ama aad baartaan gurigeyga. Waxa aan adeegsanayaa xaqa aan u leeyahay in aan iska amusnaado. Waxa aan doonayaa in aan la hadlo qareen sida ugu dhaqsaha badan ee suurogalka ah"

- Haddii aad ku jirto kor kala socosho oo shuruudaha ka mid tahay in lagu baari karo, ciidanka nabadgelyada waxaa sharcigu u ogol yahay in ay gurigaaga geli karaan.

<u>**Waxa aan doonayaa qareen**</u>

**Xuquuqdaada:**

- Haddii ay saraakiishu ku xiraan, waxa aad xaq u leedahay in dawladdu qareen kuu qabato waan in weydiisataa qareen markiiba.
- Haddii lagu xiro, waxa aad xaq u leedahay in aad telefoonka isticmaasho muddo gaaban xiritaanka ka dib, booliiskuna ma dhageysan karaan telefoonkaaga.
- Haddii ay ICE ama ilaalada xuduudda ku xiraan, waxa aad xaq u leedahay in aad qareen la tashato, laakiin xaq uma lihid in dawladdu qareen kuu qabato. Waxa aad weydiisan kartaa liiska qareenada lacag la'aanta ah ama qiimaha jaban ee dadka caawiya. .
- Haddii lagu hayo, waxa aad xaq u leedahay in adiga iyo qoyskaaga aad codsataan qareen, xaqna waxa aad u leedahay in qareen uu kugu soo booqdo halka lagugu hayo. Xaq waxa aad u leedahay in qareenkaaga uu kula socdo dhamaan dhageysiga maxkamadda ee qaaliga socdaalka.

**Goobo kale oo dheeraad ah**

- Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah, la xiriir xafiiska degaanka ee ACLU.
- Halkan waxa aad ka heli kartaa liiska cidda lala xiriirayo ee hay'adaha sharciga ee saacida qaxootiga.

<u>**Xuduudda agteeda ayaa waxaa igu haya ilaalada xuduudda**</u>

**Sidee loo yareeyaa khatarta kugu iman karta**

- Is daji marka aad la hadleyso saraakiisha socdaalka. Been ha sheegin ama saraakiisha ha siin aqoonsi been abuur ah.
- Marna haka cararin baraha koontaroolada ee saraakiisha socdaalka.

**Xuquuqdaada:**

- Waxa aad xaq leedahay in aad iska aamusnaato. Waxa aad sarkaalka u sheegi kartaa in aad ka jawaabeyso su'aalaha haddii uu qareen goob joog kanoqdo, kuma xirna dhalashadaada ama shrcigaaga.
- Khasab kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan sharciga aad waddanka ku joogto. Waxaa jira xaalado gaar ah: dadka ogolaashaha u heysta in ay ku nagaadaan Mareykanka sababo gaar ah dartood, ama inta badan, muddo gaaban (aan aheyn qaxooti oo dal ku gal ku jooga). Dadkan waxaa laga doonayaa in ay sheegaan sharciga ay waddanka ku joogaan marka la weydiiyo.
- Guud ahaan, Ilaalada xuduudda kuma heyn karaan ilaa ay hayaan “tuhun la rumeysan karo” oo muujinaya in aad jabisay sharciyada socdaalka ama kuwa dawladda dhexe.

- Saraakiisha socdaalka kuma xiri karaan haddii uusan jirin “tuhun macquul ah ” Taasi waxa ay ka dhigan tahay sarkaalku waa inuu la yimaadaa waxyaabo la taaban karo oo waxyaabaha suurogalka ah ee markaas dhacaya ama horey u dhacay, jabinta sharciyada socdaalka ama kuwa dawladda dhexe.
- Baraha kontaroolada khasab ma aha in saraakiisha tuhun galo si ay u joojiyaan oo su’aalo ku weydiiyaan goobaha baaritaanka ee rasmiga ah, laakiin su’aalahoodu waa in ay noqdaan kuwo kooban oo la xiriira sharciyada dadka. Baabuurta isha ay ku baari karaan.

**Waxyaabaha aan filikaro**

- Dadka soo gala Mareykanka iyaga oo aan soo marin baaritaanka saraakiisha socdaalka waxa suuro gal ah in laga saaro Mareykanka oo lagu qaado dhoofinta la dadajiyey Haddii lagu wargeliyey dhoofintaada waa la dadajinayaa, weydii sababta sidaas loo go’aansaday.  Sidoo kale, haddii aad ka cabsaneyso ciqaab laguu geysto haddii aad dib ugu noqoto waddankii aad asal ahaan ka timid la socodsii saraakiisha cabsidaada.
- Xuduuda laga talaabo, saraakiisha dawladda uma baahna ogolaasho maxkamadeed ama tuhun inaad dambi gashay oo way sameeyaan “baaritaan caadi ah” sida baaritaanka alaabada qofka iyo gaadiidka.
- Haddii uu sarkaalku ku weydiiyo aqoonsi, aqoonsiga aad siineyso waxa ay ku xiran tahay sharcigaaga? Dadka heysta dhalashada Mareykanka looma baahna in ay qaataan cadeyn muujineysa dhalashada Mareykanka marka ay jogaan gudaha Mareykanka. Haddii aad heysato aqoonsi sax ah oo muujinaya ee socdaalka oo da’ddau ka weyn tahay 18 sano sharcigu waxa uu waajib kaaga dhigayaa in aad heysato mar kasta. Haddii saraakiisha socdaalku ku weydiiyaan aqoonsi waa in aad tustaa, waxaa lagula talinayaa in aad tusto haddii kale xarig ayaad khatar u tahay. Haddii aad tahay qof soo haajiray oo heysan aqoonsi, waad diidi kartaa codsiga sarkaalka, inkasta oo laga yaabo in sarkaalku ku weydiiyo su’aalo dheeraad ah.

## <u>Waxaa i joojiyey booliiska, ICE ama ilaalada xuduudda aniga oo safar ku jira</u>

**Sidee loo yareeyaa khatarta kugu iman karta**

- Is daji Ha cararin, ha murnin, oo saraakiisha shaqada haka hor istaagin. Gacmahaaga markasta waa in ciidanku arki karaan
- Haddii aad gaari ku dhex jirto, dhinac uga bax wadada si amaan ah sida ugu dhaqsaha badan. Dami matoorka gaariga, shid nalka gudaha ee miraayadaha daji oo gacmaha kor saar shukaanta. Marka lagaa codsado, tus sarkaalka leesinkaaga, mulkiyadda gaariga iyo cadeynta ceymiska.
- Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka oo saraakiisha socdaalku ku weydiiyaan aqoonsi, waa in aad tustaa haddii aad heysato aqoonsi. Haddii ay da’daadu ka weyn tahay 18 sano waa in aad wadataa qoonsigaaga xilli kasta. Haddii aadan heysan aqoonsiga sharciga aad waddanka ku joogto, waxa aad ku tiraahdaa waan iska aamusnaanayaa.

**Xuquuqdaada**

Marka aad gaari ku dhex jirto:

- Wadaha gaariga iyo gaariga waxa ay xaq u leeyihiin in aad iska aamusnaataan. Haddii aad tahay rakaabka saaran gaariga, waxa aad weydiin kartaa in aad xor tahay oo aad iska bixi karto. Hadii uu sarkaalku ku dhaho haa, si tartiib ah isaga tag.
- Haddii sarkaal ama wakiilada socdaalku ay ku weydiistaan in ay eegaan gaariga gudihiisa, waad diidi kartaa in ay baaraan. Laakiin haddii uu booliisku aaminsan yahay in gaariga ay ku jiraan cadeyn fal dambiyeed ah, gaarigaaga waa la baari karaa iyada oo aan ogolaasho lagaa qaadan.
- Waxaa intaas dheer in booliiska, Ilaalada xaduuddu ay sameeyeen “waardiye” joogta ah iyaga oo gawaarida ku joojiya Mareykanka gudihiisa. Ilaalada Xudduuda waa in ay hayaan tuhun macquul ah oo wadaha gaariga ama rakaabka gaariga saaran ay jabiyeen sharciyada socdaalka ama geysteen fal dambiyeed dawladda dhexe ah.
- Xarig ama joojin muddo dheer ah oo Ilaalada Xuduuda ah waa in uu jiraa tuhun macquul ah. Waxa aad saraakiisha weydiin kartaa waxyaabaha ay ku saleynaayeen tuhankooda, waana in ay kuu sheegaan. Xaaladaas, wadaha gaariga iyo rakaab kasta oo gaariga saaran waxa ay xaq u leeyihiin in ay iska aamusnaadaan oo aysan ka jawaabin su'aalaha ku saabsan sharcigooda.

**Marka aad saaran tahay diyaarad**

- Waxaa laga yaabaa in dulliyaha diyaaradda uu diido karo inuu qof rakaab ah diyaaradda raaco hadii ay jirto sababo la rumeysan karo, in rakaabkaasu khatar ku yahay duulimaadka. Hasee yeeshee, duuliyaha su’aal kuma weydiin karo mana diidi karo inuu rakaab raaco duulimaadka taasoo ay ugu wacan tahay waxyaabo laga aamisan yahay oo ay ka mid tahay diinta, qowmiyadda, jinsiga, halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan iyo waxyaabaha uu siyaasadda ka aamisan yahay.
- Haddii aad aaminsan tahay in si khalad ah magacaaga loogu daray “liiska Dadka Aan Duulimaadka Loo Ogoleyn”, waa in aad eegtaa dadka nidaamka u degsan Dadka Aan Loo Ogoleyn Duulimaadka here.

**Saaran Baska ama Tareenka**

- Ilaalada Xuduuddu waxa ay joojiyaan basaska iyo tareenada ilaa 100 meyl oo gobolada xuduuddaha ku dhow tasoo ah xarunta basaska ama marka ay socdaan. Wax ka badan hal sarkaal ayaa fuula baska waxaana ay rakaabka weydiiyaan sharciga ay waddanka ku joogaan, iyagoo weydiiya aqoonsiga socdaalka, ama labadaba.
- Su’aalahaas waa in ay noqdaan kuwo kooban oo la xiriira in la xaqiijiyo sida uu qofku si sharci ah ugu joogo Mareykanka Mar kasta, waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato.

**Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada lagu xadgudbay**

- Qor wax kasta oo aad xasuusato, oo ay ka mid tahay lambarka sarkaalka, lambarka gaariga ay wataan, hay’adda ay ka socdaan iyo macluumaadka kale. Isku day in aad hesho halka lagala xiriirayo dadka goob joogga ahaa.
- Haddii aad dhaawacan tahay, weydiiso in aad aragto dhakhtar markiiba oo sawir ka qaad dhaawacaaga.
- Qor cabasho qoraal ah una gudbi xafiiska cabashada ee hay’adda ama gudiga dacwadaha madaniga ah. Xaaladaha qaarkood, waxa aad cabasho u soo gudbin kartaa adiga oo magacaaga qarinaya.

**<u>Waxaa la i xiray iyada oo dacwadda sharcigeyga ay ii socoto</u>**

**Xuquuqdaada:**

- Inta badan dadka la xiro iyada oo dacwad ay u socoto waxa ay xaq u leeyihiin in damaanad lagu sii daayo ama shuruudo kale oo lagula socdo.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad wici karto qareen haddii aad xiran tahay, waxa kale oo aad xaq u leedahay qareen ku soo booqda marka aad xiran tahay.

**Xaq waxa aad u leedahay in qareenkaaga uu kula socdo dhamaan dhageysiga maxkamadda ee qaaliga socdaalka.**

Maxaad yeeleysaa haddii lagu xiro ama lagu hayo

- Haddii laguu diido in lagu sii daayo ka dib marka lagugu xiro in aad jabisay sharciyada socdaalka, weydiiso in la qabto dhageysi damaanad lagugu sii daayo oo qaali lagu hor geeyo. Xaaladaha qaarkood, qaaliga socdaalka ayaa amri kara in lagu sii daayo ama damaanadda lagugu xiray la yareeyo.

**<u>Waa la i xiray oo waxa aan doonayaa in aan iska difaaco amarka dhoofinta</u>**

**Xuquuqdaada:**

- Waxa aad xaqa u leedahay in la dhageysto dacwadaada oo iska difaacdo amarka dhoofinta, haddii aadan ka harin xuquuqdaas, waa in aad saxiixdaa waxa lagu magacaabo "ogolaashaha Dhoofinta (Stipulated Removal Order)," ama aad "iskaa u Baxdaa (voluntary departure)."
- Waxa aad xaq u leedahay qareen, laakiin dawladdu kuuma qabaneyso qareen. Waxa aad weydiisan kartaa liiska qareenada lacag la'aanta ah ama qiimaha jaban ee dadka caawiya. . Haddii aadan laheyn qareen, maxkamadda weydiiso in lagu siiyo waqti aad qareen ku qabsato.

**Maxaad yeeleysaa haddii lagu xiro**

- Haddii laguu sheegay in aadan xaq u laheyn in lagu horgeeyo qaali socdaalka qaabilsan, waa in aad qareen la hadashaa markiiba. Waxaa jira xaaladaha qaarkood oo qofku uusan xaq u laheyn in qaali la horgeeyo. Xitaa haddii laguu sheego in xaaladaas sidaas tahay, waa in aad codsataa in aad qareen la hadasho waayo saraakiisha socdaalku aqoon uma laha xaaladaha sharcigu tixgelinta gaarka ah siiyo.
- Haddii aad ka cabsaneyno jir dil ama maxkamadeyn laguu geysto haddii lagugu celiyo waddankaaga, u sheeg saraakiisha oo la xiriir qareen sida ugu dhaqsaha badan. Xuquuq dheeraad ah ayaad leedahay haddii ay cabsidaas jirto.